# Barnaamijka Habraaca Qoyska

## Ku soo dhawoow Habraaca Barnaamijka Qoyska

Waxaad daawan kartaa fiidyawga si aad wax badan uga ogaato barnaamijka habraaca.

## Xuquuqahaaga Waxbarasho

Gudaha Maraykanka, dugsiyada iyo qoysasku waxay ka wada shaqeeyaan si ay uga caawiyaan ilmaha inay wax bartaan oo ay koraan. Waxaa jira sharciyo lagu hubinayo in ilmo kasta helo waxbarasho wanaagsan. Isla xuquuqaha iyo ilaalinta dugsiyada dadweynaha waxay khuseeyaan dhamaan ardayda iyo qoysaska. Ardayda u baranaya Ingiriisiga sidii luuqad cusub waxay leeyihiin ilaalin la xiriirta helitaanka taageerada luuqada iyo inay awood u yeeshaan inay ka qaybqaataan dhamaan hawlaha dugsiga.

Qoysasku waa inay fahmaan xuquuqda ardaydooda. Kadib, waxay baranayaan waxa laga filayo dugsigooda. Waxay hubin karaan inay helayaan waxbarashada ugu macquulsan. Midani waxay ka caawinaysaa ardayda u diyaarinta mustaqbal ifaya.

Wax badan ka ogaw xuquuqda waxbarashada.

## Ikhtiyaarada Dugsiga

Kheyraadkan ayaa kaa caawin doona inaad wax ka ogaato ikhtiyaada kala duwan ee dugsi ee diyaar u ah adiga iyo qoyskaaga gobolka Ohio. Waxaa ku jira macluumaadka ku saabsan dugsiyada caadiga ah ee dadweynaha, dugsiyada gaarka loo leeyahay ee ay dawladu maalgaliso, iyo dugsiyada gaarka ah loo leeyahay. Waxaa jira sababo badan oo qoysasku uga doorteen hal nooc oo dugsi nooca kale. Ohio waxay leedahay sideed ikhtiyaar oo dugsi iyo sidoo kale ikhtiyaaro loo helayo ardayda naafada ah.

Caruurtu waxay aad ugu badan tahay inay ku fiicnaadaan dugsiga marka waalidkood ama daryeelayaashooda ay ku lug leeyihiin. Si aad uga qaybqaadato waxbarashada ilmahooda waxay caawinaysaa waalidiinta ama daryeelayaasha inay fahmaan sida dugsiyadu u habaysan yihiin. Nidaamyada dugsiyadu way kala duwanaan karaan. Waa mid waxtar leh in la ogaado waxa ay qoysaska, waalidiinta, ama daryeelayaashu u

[Copyright] ©2024 Center on Education and Training for Employment, The Ohio State University

leeyihiin inay taageeraan ilmahooda.

Wax ka ogaw Ohio Statewide Family Engagement Center's Choose a School Tool si aad qoyskaaga uga caawiso inay u doortaan ikhtiyaarka dugsiga ugu fiican ilmahaaga.

## Isdiwaangalinta

### Ka diiwangelinta Ilmahaaga Ohio

Bilaabitaanka dugsi cusub waa wakhti xiiso u leh caruurta iyo qoysaskooda. Waa bilawga xiriir cusub oo lala yeesho asxaabta iyo macalimiinta. Sidoo kale waa wakhti uu qoyskaagu kamid noqonayo bulshada dugsiga. Kahor intaysan caruurtaadu bilaabin dugsiga, waa inaad diiwaangelisaa. Mudada diiwaangelinta, waxaad ogaan doontaa barnaamijyo badan iyo waxa dugsigu u hayo ardayda iyo qoysaska.

Wax badan ogaw diiwaangelinta ilmahaaga dugsiga.

### Fahamka Soo xaadiritaanka Dugsiga

Caruurta inta badan aada dugsiga waxay u badan tahay inay ku fiicnaadaan dugsiga. Ardayda dhigata dugsiga maalin kasta waxay sagaal jeer uga dhow yihiin inay ka qalinjabiyaan dugsiga sare. Waxay kaloo lix jeer uga dhowdahay inay ku guulaystaan akhriska marka ay gaaraan fasalka sadexaad. Sababtan awgeed, caruurta ayaa laga filayaa inay dugsiga soo xaadiraan intii suurtogalka ah. Ohio gudaheeda, dugsiyadu waxay hayaan diiwaanka tirada saacadaha ay ilmaha dugsiga soo xaadiraan.

Wax badan ka ogaw soo xaadiritaanka dugsiga.

### Fahamka Horumarka Waxbarasho ee Ilmahaaga

Fahamka horumarka tacliin ahaaneed ee ilmahaaga ayaa muhiim u ah guushooda dugsiga. Markaad ogaato sida wanaagsan ee ay waxbarashadooda ugu fiican yihiin, waxaad u taageeri kartaa oo aad si hufan u hagi kartaa. Waxaa jira siyaabo kala duwan oo laga yaabo in dugsiga ilmahaagu u qiimeeyo waxbarashadooda, sida imtixaanada iyo shaqooyinka. Kuwani waxay bixiyaan aragtiyo muhiim ah oo ku saabsan socdaalkooda waxbarasho.

Wax badan ka ogaw horumarka tacliin ahaaneed iyo darajaynta.

## Taageerooyinka Luuqada Ingiriisiga

Dugsiyada Ohio iyo macalimiinta waxay rabaan caruurtu inay ka faa'iidaystaan fursadaha ay si fiican ugu wada xiriiraan aduunka. Tan waxaa kamid ah bixinta taageerooyinka luuqada Ingiriisiga ardayda u baahan yihiin. Dugsiyadu waxay leeyihiin talaabooyin gaar ah iyo taageerooyin si ay uga caawiyaan ardayda horumarinta xirfadahooda Ingiriisiga.

Wax badan ka ogaw taageerada luuqada Ingiriisiga.

## Si Wadajir ah u Shaqaynta Si Guul Loo Gaaro

### Kala shaqaynta Dugsiga Guusha Ilmahaaga

Ma jiro qof uga aqoon badan ilmahaaga adiga iyo qoyskaaga. Waxaad la xiriiri kartaa dugsiga markaad rabto inaad wax ka ogaati sida loo taageero waxbarashada ilmahaaga ama marka ilmahaagu u baahan yahay caawimaad. Waxaad sidoo kale oo aad la xiriiri kartaa dugsiga si aad u hubiso in ilmahaagu uu hormar samaynayo.

Wax badan ka ogaw la shaqaynta dugsiyada.

### Sida Looga Qaybqaato Gudiyada Dugsiga iyo Kooxaha

Marka qoysaska iyo macalimiintu wada shaqeeyaan, caruurtu waxay u badan tahay inay guulaystaan, soo xaadiraan dugsiga maalin kasta, oo ay dareemaan inay xiriir la leeyihiin ardayda ay isku fasalka yihiin iyo macalimiintooda. Waalidiinta iyo daryeel bixiyayaasha ku lug leh dugsiga waxay dareemayaan inay qayb ka yihiin bulshada dugsiga. Hal hab oo muhiim ah oo qoysaska qaar ay u doortaan inay ka qaybgalaan dugsiga ilmahooda waa inay ku biiraan koox ama gudi ka jira dugsi. Waalidiinta iyo daryeel bixiyayaasha waxay awoodaan inay la kulmaan qoysaska kale oo ay la shaqeeyaan macalimiinta iyo maamulayaasha si ay go'aano uga gaaraan dugsiga ama degmada.

Wax badan ka ogaw oo ka qaybqaadashada dugsiga ilmahaaga.

[Copyright] ©2024 Center on Education and Training for Employment, The Ohio State University

# Qalin-jabinta

"Waan ognahay inaysan fududayn, laakiin waxaad u qabanaysaa shaqo weyn mustaqbalka ilmahaaga." – Macalinka Ohio

## Taagerida Qalin-jabinta Ilmahaaga

Ka qalinjabinta dugsiga sare waa talaabada koobaad ee muhiimka ah ee da'yarta qaangaarka ah si ay wax uga ogaadan kuliyadooda iyo ikhtiyaaradooda mihnad ahaaneed. Si loo hubiyo in ardaydu u diyaar garoobeen guul mustaqbalka, dugsiyada Ohio waxay leeyihiin shuruudo ay tahay in ardaydu dhamaystiraan si ay u qalin-jabiyaan. Waxaad ka caawin kartaa ilmahaaga inuu qalin-jabiyo oo u diyaargaroobo mustaqbalkooda. Dib u eeg shuruudaha qalin-jabinta iyo siyaabaha kala duwan ee aad u taageeri karto.

Wax badan ka ogaw qalin-jabinta.

## U Diyaarinta Ilmahaaga Mustaqbal Ifaya.

Qoyskaagu waxa ay door muhiim ah ka ciyaaraan u diyaarinta ilmahaaga mustaqbalka. Si kastaba ha ahaatee wadada uu ilmahaagu qaado, waxaad ku taageeri kartaa iyaga oo ka caawinaya inay ogaadaan ikhtiyaarada ay haystaan mustaqbalka. Waxaad waydiin kartaa wadooyinka ama mihnadaha ay xiiseeyaan. Ama waxaad ku bilaabi kartaa inaad waydiiso riyooyinkooda iyo hadafyadooda. Waxa kale oo aad ogaan kartaa caawimada laga heli karo dugsiga ilmahaaga iyo bulshadaada.

Wax badan ka ogaw kuliyadda iyo ikhtiyaarada mihnad ahaaneed.

# Taageero Dheeraad ah

## Ka Caawinta Ilmahaaga Waxbarasho Khadka Fogaan araga ah (ama Onlayn).

Waxbarashada fogaan araga ah waa hab wax lagu barto iyadoo la isticmaalayo tignoolajiyada waxayna bedeshay habka aan wax u barano dugsiga. Waxay siisaa caruurta da' kasta leh fursad ay si dhakhso ah u koraan fahamkooda aduunka ku hareeraysan. Si looga faa'iidaysto tignoolajiyadan, dugsiyadu waxay isticmaalaan wax

ku barashada khadka fogaan araga si ay uga caawiyaan ardayda waxbarashadooda. Habka ay dugsiyadu u isticmaalaan wax ku barashada khadka fogaan araga ah way ka duwanaan kartaa dugsi kasta iyo heer fasal kasta. Waa muhiim in la fahmo sida loo taageero waxbarashada khadka fogaan araga ah ee guriga.

Wax badan ka ogaw waxbarashada fogaan araga ah ama khadka tooska ah.

## Barnaamijyada ardayda ee ka baxsan wakhtiga dugsiga

Gudaha Ohio, waxa jira barnaamijyo ardaydu ku biiri karaan wakhti ka baxsan wakhtiga dugsiga. Barnaamijyadani waxay noqon karaan kahor ama kadib dugsiga. Qaarkood waxaa laga yaabaa inay jiraan xiliyada fasaxyada dugsiga. Barnaamijyada qaarkood waxay siin karaan taageero dheeraad ah ardayda u baahan in laga caawiyo dugsiga. Waxay ka caawin karaan ilmaha inay ku si wanaagsan wax uga bartaan dugsiga iyagoo siinaya goobo xasiloon oo ay ku qabtaan shaqada guriga oo ay galaan kombuyuutar iyo internetka. Waxay sidoo kale ku siin karaan caawimaad dheeraad ah shaqada dugsiga ama waxay yeelan karaan hawlaha madadaalo leh oo bara waxyaabo cusub. Barnaamijyadan, caruurtu waxay ku samaysan karaan saaxiibo cusub oo ay wax ka baran karaan kuwa kale. Qoysasku waxa laga yaabaa inay u baahdaan inay diiwaangeliyaan ilmahooda ama ay la kulmaan sharciyo gaar ah. Barnaamijyadani waxay noqon karaan lacag la'aan ama waxaa jiri kara kharashyo dheeraad ah. Xitaa qaar kamid ah caruurta siiya cunto ama ka caawinta gaadiidka.

Wax badan ka ogaado barnaamijyada ka baxsan dugsiga.

## Taageerida Caafimaadka Dhimirka Ilmahaaga

Gudaha Ohio, dugsiyadu waxay ka shaqeeyaan inay taageeraan ilmaha oo dhan. Midani waxay ka dhigan tahay in dugsiyadu daneeyaan guusha waxbarasho iyo fayo-qabka arday kasta. Sababtan awgeed, dugsiyadu waxay bixiyaan kheyraad lagu taageerayo caafimaadka maskaxda ee ardayda.

Wax badan ka ogaw taageerida caafimaadka dhimirka ee ilmahaaga.

## Isticmaalka Turjubaanada Isgaarsiinta Dugsiyada

Gudaha Ohio, dugsiyada iyo qoysasku way wada shaqeeyaan si ay u caawiyaan

caruurta inay guulaystaan. Waxay sidaas ku sameeyaan iyagoo wada hadlaya oo xogta muhiimka ah wadaaga. Dugsiyadu waa inay wadaagaan macluumaadka luuqadaha ay qoysasku doorbidaan. Qoyskaagu waxay caawimaad ka heli karaan turjumaanada si ay su'aalo u waydiiyaan oo ula wadaagaan fikradahaaga ama walaacyada aad ka qabto dugsiga.

Wax badan oo ka ogaw isticmaalka turjumaanada.

## Liistada Ururada

### Kheyraadka Laga Helo Gudaha Ohio

Ururadani waxay diirada saaraan ka caawinta qoysaska ku cusub Ohio ee ku hadla luuqado aan ahayn Ingiriisi.

Kusoo dejiso nuqul kamid ah liiska ururada kumbuyuutarkaaga ama aaladaada.

## Qaamuuska

Qaamuuskan waxaa loogu talagalay inuu ku siiyo qeexitaano fudud iyo sharaxaadyo ereyo caadi ah oo ku saabsan dugsiga iyo waxbarashada. Kheyraadkan ayaa kaa caawin doona inaad si fiican u fahanto waxbarashada ilmahaaga.

Wax ka ogaw qaamuuska.

*Khayraadkan waxay ujeedadoodu tahay inay xoojiyaan tacliinta, fayo-qabka ardayda iyo kuliyada iyo natiijooyinka shaqada ee ardayda luuqadaha badan ku hadla ee Ohio. Khayraadka waxaa lagu sameeyay dadaal iskaashi oo u dhexeeya Waaxda Waxbarashada iyo Shaqaalaha ee Ohio (Ohio Department of Education and Workforce) iyo Ohio State University's Center on Education and Training for Employment oo ay weheliso koox u heelan oo u doodaha qoyska, hogaamiyeyaasha bulshada, shaqaalaha dugsiga degmada, iyo macalimiinta.*

[Copyright] ©2024 Center on Education and Training for Employment, The Ohio State University